

To: Geosol

Sida Maxakamach
sod amantay, raacayana
amar ka Maayirke,
sod process ganeeyo
si loo hirfiro

~~Amantay~~

07-04-2025



MAXKAMADA DEGMADA HARGEYSA

XAFIISKA GUDOOMIYAHA

MDH/J/DFL/272/2020

TAARIKH:- 05/04/2025

KU:- MAAYARKA CAASIMADA

=HARGEYSA=

OG:- Dhaxlayaasha Marxuum Muxumed Nuur Caynaanshe=HARGEYSA=

Og:- Gudoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka Gobolka M-Jeex Hargeysa

Ujeedo:- Amar Tirtirid Faylal Sifo qaldan loo samaystay oo ka mid ahaa beerta Dhaxalka ahayd ee ilma Muxumed Nuur

Maxkamadda Degmadda Hargeysa: -

Markay Aragtay:-Arjiga codsiga ah ee ku taariikhaysan 03/04/2025 ujeedadeeduna tahay Codsii in nalaga tirtiro Tr-ka ka baxay dhulka Maxkamaddu na dhaxalsiisay kaas oo ay Maxkamadda u soo qortay Istaahil Cali Xasan.

Markay Deristay:-Qaraarada sumadahoogu yihiin MDH/J/DML/1186/2013 ee 24/09/2017, MRGMJ/DMRL/28/2015 ee 24/04/2015, MS/750/2018 ee 10/03/2019, MS/DB/107/2019 ee 18/04/2020 kuwaas oo dhamaantood qaraariyey in beerta ku taala Degmada 31-ka May xaafada Sh-Muuse Ducaale oo cabirkeedu dhan yahay 9.3 Hector jihooyinkeeduna yihiin Waqooyi—Waddo, Koonfur—Buur, Bari---Beerta X.Axmed Cabdi, Galbeed---Waddo ay leeyihiin ilma Muxumed Nuur, isla markaasna cabirka dhan 1.2 Hector uu yahay Biyo shubkii ay beertu buurta ku lahayd.

Markay Deristay:-Qaraarka Maxkamadda Degmada Hargeysa ee sumadiisu tahay MDH/J/DFL/273/2020 ee 09/09/2023 ujeedadiisuna tahay Qaraar qaybin dhaxal, kaas oo ay Maxkamaddu ku qaybisay dhaxalkii uu ka tagay Marxuum Muxumed Nuur Caynaanshe kuna caddahay dhaxle kastaa saamiga uu helay.

Markay Aragtay:-Warqada sumadeedu tahay MDH/J/DFL/272/2020 kuna taariikhaysan 23/11/2024 ujeedadeeduna tahay Amar xayiraad ka qaadid taas oo ay Maxkamaddu kaga qaaday xayiraadii saarnayd beerta dhaxalka ah ee ilma Muxumed Nuur Caynaanshe ugana qaaday dhaxlayaasha kala ah 1.Aamina Muxumed Nuur, 2.Hibo Muxumed Nuur, 3.Axmed Muxumed Nuur.

Ku: Geesol
Ku: an shukle

Waxaa soo qortay faysal faysal maxkamadda
loo amonay in loo giliin

05/04/2025

kuwaas oo sifo qaldan loo ihiyey
dhulkaasina uu ahaa dhul dhaxal ah oo ay wada lahaayeen ilma
Muxumed Nuur.

Markay Aragtay:- Asbaabta Sare ku xusan Darteed waxay Maxkamadu laga
bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 05/04/2025 waxay soo
Saartay Amarkan hoos ku qoran:-

AMARKA TIRTIRIDA

Maxkamadda Degmada Hargeysa waxay amraysaa Dowlada hoose ee Hargeysa in
ay tirtirto faylasha loo soo saaray baloodhyo ka mid ah beerta ilma Muxumed Nuur
Caynaanshe ee ku taala Degmada 31-ka May Xaafada Sh-Muuse Ducaale
faylaashaas oo faahfaahintoodu yihiin:-

1. Balooqa koowaad ee Beerta guud ahaantii
2. Shan Baloodh oo leh Tr-No 9866
3. Saddex Baloodh o oleh Tr-No ~~8961~~ = 9861
4. Laba Baloodh o oleh Tr-No 9917

Hadaba Maxkamaddu waxay mar labaad amraysaa in la tirtiro faylasha loo soo
saaray dhulka dhaxalka ah ee ka mid ahaa beerta ilma Muxumed Nuur Caynaashe
ee sare ku faahfaahsan kuwaas oo uu sifo qaldan looga samaystay Dowlada Hoose.

ALLAAH MAHAD LEH

Yaxye Xuseen Yuusuf

Gudoomiyaha Maxkamadda Degmada Hargeysa

Kaaliye:- Cabdiqani Jaamac Xuseen

